



URUURINTA XOGTA BUKAANKA CUSUB

Marka xigta ee aad tagto isbitaalka, waxaa laga yaabaa inaad aragto ama lagu weydiiyo su'aalo cusub oo kusaabsan isirka, qowmiyada, luuqada, rabitaanka galmada, jinsiga, iyo naafonimada.

Isbitaaladu waxay macluumaadka ku saabsan joogitaanka bukaanka la wadaagaan Washington State Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington). Sharciga Washington waxa uu hadda uga baahan yahay dhakhaatiirta isbitaalka inay bukaanada wax ka weydiiyaan macluumaadka kusaabsan isirka, qowmiyada, luuqada, rabitaanka galmada, jinsiga, iyo naafonimada.

DOH waxa ay kala shaqaysay jaaliyadaha kudhaqan Washington markii ay soo saareysay qeybaha cusub. Macluumaadkaan wuxuu ka caawiyaa gobolku inuu fahmo cidda adeegsata adeegyada isbitaalka iyo sababaha ay u adeegsadaan. Marka DOH fahamto sida jaaliyaduhu u isticmaalaan isbitaalka, waxaan jaaliyadaha ugu adeegi karnaa si macno badan leh.

WAA MAXAY SABABTA AAN U WEYDIINO

Jawaabaha aad ka bixiso su'aalahaan waxa ay gacan kageystaan caafimaadka dadweynaha. Saraakiisha caafimaadka dadweynaha waxay rabaan inay ogaadaan cidda inta badan saameynta ay ku yeeshaan sinnaan la'aanta helitaanka daryeelka caafimaadka, tayada daryeelka caafimaadka, iyo natiijoyinka caafimaadka. Markii aan ognahay sida ay jaaliyaduhu u isticmaalaan isbitaalka, waxaan qorsheyn karnaa sida ugu wanaagsan ee lagu caawiyo jaaliyadaha. Sinnaan la'aanta daryeelka caafimaadku waa arrin adag. Markasta oo aan sii fahano waan kasii wanaagsanaaneynaa.

WAAD GO'AANSAN KARTAA

Adiga ayey kugu xiran tahay inaad ka jawaabto su'aalahaan iyo in kale. In kasta oo isbitaalku ay tahay inuu ku weydiiyo dhammaan su'aalaha, hadana qasab ma ahan inaad ka jawaabto. Su'aalaha aadan rabin inaad ka jawaabto, waxaad dooran kartaa "Patient declined to respond (Bukaanku wuu ka gaabsaday inuu ka jawaabo." DOH waxay rajeyneysaa inaad ka jawaabi doonto su'aalahaan, si markaa aan si wanaagsan ugu adeegno adiga iyo dhammaan dadka reer Washington.

SIDEE BAAD U ASTUREYSAAN SIRTEYDA?

Waxaan rabnaa in qof walba uu ammaan ku qabo inuu ka jawaabo su'aalaha. Macluumaadkaaga si adag ayaa loo xafidayaa waxaana loola dhaqmi doonaa sidii diiwaan caafimaad oo dadweyne oo qarsoodi ah. DOH ma raaciso macluumaadka shakhsi ahaaneed, sida magaca ama taariikhda dhalashada, marka ay ka warbixineyso xogta.

Nala wadaagista macluumaadkaaga wax saameyn ah kuma yeelan doonto gunnooyinka aad ka hesho gobolka, sida SNAP ama Apple Health. Macluumaadkaan lalama wadaagi doono saraakiisha socdaalka.